Portland Public Schools

2020 PPS FALL

Reimagining Education During the Pandemic

# Macluumaad ku saabsan Jadwalka Dugsiyada Dhexe ee Muuqaal Baahiyaha

**Sebtamber 21, 2020**

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Maadaama aynu ka wareegnay jadwalkii bilowga sanad-dugsiyeedka ee labadii todobaad ee tagay una gudbnay waxbarashadeena muuqaal-baahiyaha guryaha ardaydu casharadoodii ku qaadaneyso, qoysaska waxa ay nala soo wadaageen su'aalo ku saabsan jadwalada dugsiyada dhexe.  Waxa aan ka warqabnaa inaad tihiin jaal muhiim ah marka ay noqoto waxbarashada ardayda, markaa waa inaan xaqiijino in aad heshaan jawaabaha inta badan la iska weydiiyo arrintani inta badan.  Haddii aad xiiseyneyso tilmaamaha gobolku uu ka bixiyo ee kana dambeeya jadwalada Dugsiyada Dadweynaha Portland, waxaa hoos kuu yaala linki aan ka sameyn karto tixraac.

**Waa maxay sababta ay jadwalka dugsiyada dhexe ee PPS u isticmaalaan maalmaha Isniinta iyo Tallaadada kaliya fasalka dhan in casharadiisu ay si toos ku baxaan muuqaal baahiyaha waqtigu sida uu u dhan?**

- Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay ka gudbeen shuruudihii ay kula taliyeen Waaxda Waxbarashada Oregon (ODE) ee fasalada jadwalka 6-8.
- Cilmi baaris lagu sameeyey dugsiyada dhexe waxa ay xoog saartay muhiimada ay leedahay koritaanka doorashada iyo kala duwanaanshaha ardaydu waxyaabaha cusub ee ay dooranayaa – sidii ay ardaydu u heli lahaayeen wax ay iyagu doortaan marka ay noqoto fasalada waxbarashada, waxa ay u baahan yihiin inay ka qeybqaataan dhammaan fasalada oo dhan( maaha dhammaan fasalada oo dhan nus ka mid simistarka sida ay dugsiyada sarre, taasi oo u ogolaaneysa ardaydu inay helaan barashada Luqada, Sayniska, iyo Cilmiga Bulshada).
- Golle Weynaha Iskuulada Magaalada(The Council of Great City Schools) waxa ay xoog saaraan muhiimada ay leedahay in loo qeybiyo heerarka fasalada ardayda waqtigooda waxbarashada ⅓ oo ah in macallinka si toosa fasalka ardayda wax ugu barayo iyo ⅔ ay ardaydu waxbarashada ku qaadanayaa online ama casharo mar hore la sii duubay.
- In waqti yar la qaato fasalada casharadoodu ku baxayaan si toos muuqaal baahiyaha taasi oo u saamaxaysaa iyaga oo isku dhan in ay helaan waqti lagu caawiyo ardayda waxbarashada ku liidata, sidoo kalena macallinka iyo ardaygu ay ku wada xiriiraan qof iyo qof marka uu u baahdo in lala qabto waxyaabo dheeraad ah dhinaca casharada ardayga.

**Waa Maxay Waxbarashada La Dabaqayaa?**

- Waa barashada lagu dhaqmayo/la dabaqayo oo ah shaqo macallinku u qorsheeyey dhammaan ardayda sidii ay uga caawin lahayd inay xirfadaha ay dabaqaan iyo inay casharada ka bartaan

waxyaabo cusub. Ardayda waxa ay sameynayaan “waan qabtaan”/inay u qabtaan si madaxbannaan qeyb ka mid ah casharka. Waxbarashadii ay macallimiintu ku bixin jireen fasalada iskuulka dhexdiisa, macalinku si caadadda ah waxa ay siin tilmaamo toos mararka qaarkood marka ugu horeysa (“Waan sameeyaa”), ka dibna waxa ay siin waqti ay ku taageeraan inay wixii ay sameynayeen ku celceliyaan (“waan sameynaa”), intaas ka dib waxa ay ardayda la siin waqti ay xirfadihii cusbaa ee ay barteen ku celceliyaan (“waan sameynaa”). Haddaba casharada lagu bixiyo muuq baahiyaha, “Waan sameeyaa” iyo “waan sameynaa” waxa ay dhici doonaa inta fasalku muuq baahiyaha sida tooska ugu jor ee casharada la dabaqayo.

- **Waaxda Waxbarashada Gobolka Oregon waxa ay u sharaxdaa Barashada La Dabaqyo sidani** “Waayo-aragnimo [taasi oo] u ogolaaneysa ardayda inay cilmigii iyo xirfadihii ay barteen dabaqaan iyada oo macallinkuna fudeydinayo . . . Waayo-aragnimada barashadu waa mid macallinku si ula kac ah ugu talogalay inay ardayda si qotodheer oo macno leh ula hawlgalaan, iyada oo loo ogolaanayo inay ardayda isku filka ahi wada xiriiraan, iyo in la taageero qoyska iyo ka qeybqaadashada bulshada…. Waayo-aragnimada waxbarashada la dabaqayo waa mid loogu talogaly sidii ay u caawin lahayd dariiqooyinka barashada madaxa-bannaan, ay hawsha casharada si madaxbannaan u qabtaan, iyo inay barashada casharadood ama xirfadaha ay dabaqayaan si madax bannaan u qabtaan.”

**Sidee ayaan ku ogaan karayaan in ardaygeyga loo diiwaangaliyey koox kooban todobaadkiiba iyo/ama marka ardayga macallimiintu ku martigalinayaan xafiisyadooda saacadaha shaqada?**

- Macallimiinta ayaa go’aan ka gaari ardayda u baahan gargaar dheeraada ah oo dhinaca waxbarashada ah, ardayda waxbarashada ku hooseysaa marka ay u baahan yihiin in la gargaaro, iyo/ama in waqtiga loo dheereeyo todobaadkii ay gartaan.
- Adiga iyo ardaygaagu waxaa idinla soo xiriiri doona macalinkiina xiriirkaasi oo ku saabsan in ardaygaaga la diiwaangaliyey koox kooban haddii uu u baahan yahay gargaar dheeraad ah oo dhinaca waxbarashada ah, in kor loo qaado maadaama uu waxbarashada ku hooseeyo, ama in waqtiga loo dheereeyo casharadaas uu todobaadkaasi qaatay.
- Macallimiinta intooda badani waxa ay sameyn doonaan jadwal todobaadle ah saacadaha shaqada xafiiska oo la mid ah todobaad kasta. Arrimaha qaarkood, waxa ay suurtagal ah inay ka duwanaadaan iyaga oo ay ku xiran tahay cutubka.
- Waxaa dhici karta inay macallimiintu ay kugu soo xiriiraan iyaga oo kuu soo diraya fariin degdeg ah (text) iyo email.

**Muxuu noqonayaa dhibcaha la bixinayaa?**

- A-F ama dhibcaha la isticmaalo oo lagu qiyaaso barashada waxbarashada,taasi oo ku xiran nidaamka dhibcaha ay u bixiyaan iskuulkaaga ka hor intii aan waxbarashada loo wareejin inay ardaydu ku qaataan qaabka muuq baahiyaha.
- Waxa ay la jaanqaadayaan talo bixinta ay sameeyeen Waaxda Waxbarashada Oregon ee bogga 26 iyo 27 ee Hagaaha Barashada Waxbarashada Dhammeystiran ee Guryaha Lagu Qaadanayo.